Galka xogta ee shaqaalaha safka hore

Mawduucyada

Fariin ka timid Oregon Health Authority (Maamulka Caafimaadka ee Oregon) 1

Qodobbada Wadahadalka/Farriimaha Muhiimka ah 2

QOFKEE ayaa qaadan kara tallaalka? GOORMA? 2

HALKEE ayaan ka helayaa talaalka? 2

SIDA loo helayo ballan tallaal 3

SABABTA loo qaadanayo tallaalka 3

Maxaan u baahanahay inaan ogaado kahor intaanan tagin 4

Waxaad filanayso tallaalka kadib 4

Su'aalaha Inta badan la Isweydiiyo 3

Su'aalo loo-shaqeeyayaashu ay qabi karaan 5

Kuwa soo socda waa su'aalo aad ka heli karto shaqaalaha 6

Su'aalaha Siinta Tallaalka 7

Sidaad u taageerayso munaasibadaha tallaalka deegaanka iyo/ama aad u qabanayso munaasibad 8

Shaqaalaha carbinta ee munaasibadaha tallaalka deegaanka/munaasibadaada tallaalka 8

Qabo munaasibad tallaal bixin 8

Kheyraadka baahiyahaaga isgaarsiineed:
Tusmada iimayl, Nuxurka wargayska, Nuxurka warbaahinta bulshada

Farriin ka timid Oregon Health Authority (Maamulka Caafimaadka ee Oregon)

Maamulka Caafimaadka Oregon waxay kaaga mahad celinayaan ka caawinta shaqaalahaaga si ay iskaga tallaallaan COVID-19. La shaqayntaada iyo ka go'anaanshaha xubanahaaga caafimaadka waxay caawin doontaa badbaadinta nafaha. Waannu idin la wadaagi doonnaa macluumaadka intaan sii wadno barnaamijka tallaalka COVID-19 ee Oregon. Fadlan ku dareen xorriyad inaad u fududayso nuxurkan shaqaalaha/xubnaha aad gaarto. Waxaad qayb muhiim ah ka tahay dedaalka gobolka si loo hubiyo in shaqaalaha safka hore ee Oregon ay haystaan macluumaad sax ah oo ku saabsan halkay u aaddi karaan tallaalka. Haddii aad su'aalo ka qabtid qalabkan, fadlan la xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka ee OHA halkan COVID.19@dhsoha.state.or.us.

Ka hubi cusbooneysiimaha Galka Xogta Xiriirada ee ah https://govstatus.egov.com/or-oha-covid-resources.

Qodobbada Wadahadalka/Farriimaha Muhiimka ah: Waxay Shaqaalahaagu u Baahan yihiin inay ka Ogaadaan Tallaalada COVID-19 ee Oregon

QOFKEE ayaa qaadan kara tallaalka? GOORMA?

Oregon waxay u bixinaysaa tallaalada wejiyo: Keliya dadka ku jira kooxaha uqalma waa ay qaadan karaan tallaalka. Dhammaan shaqaalaha safka hore way uqalmaan tallaalka laga bilaabo Abriil 5, 2021. Waa kan liiska dhammayska tiran ee cidda loo tixgelinayo shaqaale safka hore ah.

Macluumaadka Isku xigitaanka Tallaalka

HALKEEN ka qaadan karaa tallaalka?

Dadka ku nool Oregon waxay ka qaadan karaan tallaalada dhowr goobood.

Macluumaadka Goobta Tallaalka

Tallaalada waxaa loo keeni doonnaa wakiilada shaqaalaha ee ku sugan:

- Goobaha tallaalka ee dadka badan
- Farmasiyada
- Hay'adaha caafimaadka dadweynaha deegaanka
- Qaar ka mid ah xarumaha caafimaadka
- Qaar ka mid ah goobaha shaqada
- Qaar ka mid ah goobaha shaqaalaha guryeynta

Si aad u muujiso danaynta qabashada munaasibad tallaal goobtaada shaqada ama goobta shaqaalaha guryeynta, la xiriir maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga. Fadlan ogsoonow in xaddidaadaha bixinta iyo tallaal bixiyayaasha macnaheedu yahay in qayb ka mid ah codsiyadan la oggolaan doono.

Macluumaadka tallaalka COVID-19 ee degmo ahaan.

SIDAAD u helayso ballan tallaal

Dadka Oregon ee uqalma waxay tegi karaan covidvaccine.oregon.gov si ay u hubiyaan macluumaadka tallaalka ee bulshooyinkooga, oo ay isaga diiwaangaliyaan Qalabka Istallaal ee Oregon, oo ka hubi macluumaadka gaarka ah ee degmada. Qabashada ballamaha hadda lagama heli karo covidvaccine.oregon.gov laakiin waxaa jira lingaxyo ah Maamulada Caafimaadka Dadweynaha ee Deegaanka iyo goobaha tallaalka dadka badan wixii ballamo ah.

Shaqaalaha safka hore waa inay hubiyaan sanduuqa sheegaya inay yihiin shaqaale safka hore ah markay iska diiwaangeliyaan qalabka Istallaal ee Oregon. Shaqaalaha safka hore waxaa la siin doontaa mudnaanta lingaxyada lagu furayo ballamaha muddada waqtiga kadib marka uqalmitaankoogu furmo Abriil 5.

Shaqaalaha safka hore waxa kale oo ay caawimaad ka heli karaan iyagoo u diraya farriin qoraal ORCOVID lambarka 898211 (Kaliya Ingiriisi iyo Isbaanish) ama iimayl u diraya ORCOVID@211info.org (caawinaada luqadda ayaa la heli karaa). Haddii aadan ku heli karin jawaabaha su'aalaha tallaalka COVID-19 websaydka, qoraal ahaan, ama iimayl, waad wici kartaa 211 ama 1-866-698-6155, oo ah lambar bilaash ah oo furan laga bilaabo 6 a.m. ilaa 7 p.m. maalin kasta, xitaa fasaxyada. Waqtiyada sugitaanku way dheeraan karaan sabab la xariirta wicitaannada oo badan. Farmasiyada, dadka Oregon ee uqalma waxay si toos ah uga samaysan karaan ballamaha tallaalka websayd-yada. Farmasiyada ayaa baari doona uqalmitaanka.

Liiska halka iyo sida loo helayo tallaallada COVID-19, tag:
https://govstatus.egov.com/find-covid-19-vaccine

MAXAA la isku tallaalayaa

Tallaalada COVID-19 waxay inaga caawin karaan dibu soo celinta waxyaabaha aan jecelnahay Dhammaanteen waxaan rabnaa inaan dib ugu laabano nolosheeni. Tallaaladu waxay inaga caawin karaan waxyaabo badan oo aan u xiisnay in badan. Marka dad ku filan la tallaalo, waxaynnu awoodi doonnaa inaan aragno kuwaan jecelnahay, u dabaaldegno ciidaha, oo aan ku laabano nolosheeni caadiga ahayd.

Faa'iidooyinka qaadashada tallaalka COVID-19

Maxaan u baahanahay inaan ogaado kahor intaanan tagin?

Tallaalkee ayay tahay inaad qaadato? Midka la bixinayo. Dhammaan tallaalada COVID-19 ee hadda laga heli karo Maraykanka waxaa ansixisay FDA iyadoo la waafajinayo Oggolaanshaha Adeegsiga Degdegga ah. Tani waxay ka dhigan tahay in si balaadhan loo baadhay oo la caddeeyay inay badbaado iyo waxtar u leeyihiin yaraynta xanuunka daran, isbitaal dhigida, iyo geeridaba.

Istallaal isla marka ay tahay doorkaagii. Inkastoo agabka tallaalku uu hadda xaddidan yaahy, saraakiisa caafimaadka dadweynaha ayaa ka shaqaynaya inay sameeyaan tallaalo ay heli karaan qof walba. Si aad u ilaaliso naftaada oo aad uga hortagto faafitaanka COVID-19, waxaa muhiim ah inaad istallaasho isla markay noqoto markaagi.

Badbaadada iyo Waxtarka Tallaalka

Waxaad filanayso tallaalka kadib

Kadib tallaalka COVID, waxaad yeelan kartaa waxoogaa waxyeello ah. Kadib markaad qaadato tallaalka, waxaa jiri kara xanuun yar, casaan, ama barar ku yimaadda goobta mudista. Waxaad noqon kartaa qof daalan, leh madax xanuun ama murqo xanuun, qandho (waa dhif) ama lallabo. Tan ayaa ka dhigan in tallaalku shaqaynaayo si loo dhawro caafimaadka jirkaaga.

Waxyeellooyinka Tallaalka

Marka si buuxda lagu tallaalo, waa inaad sii wado inaad qaado tallaabooyinka badbaadada si aad u ilaaliso naftaada iyo kuwa kale sababtoo ah COVID-19 waa fayras cusub oo khubaraduna waxay sii wadaan inay wax badan ka bartaan cudurkan.

Waxaynnu u baahanahay inaan u qabano si wadajir ah

Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo

Su’aalo ay qabi karaan loo-shaqeeyayaashu:

Yaa loo xisaabinayaa shaqaalaha safka hore?

Fadlan eeg xogta sawirka ah ee isku xigitaanka tallaalka ee OHA ee liiska ah cidda uqalanta iyo waqtiga.

Shaqaalaha ama loo-shaqeeyayaashu miyay u baahan yihiin inay keenaan caddayn ah in shaqsiyaadka shaqaalaha ah ay yihiin shaqaalaha safka hore?

Maya. Waxaanu aaminaynaa nidaamka maamusitaanka. Shaqaalaha safka hore ma muujin doono caddayn ah inay uqalmaan, laakiin bixiyayaasha tallaalka ayaa weydiin kara inay caddeeyaan inay yihiin.

Suurtogal ma noqon doontaa in la isku tallaalo goobta?

Haa, waxaan rajaynaynaa in qaar ka mid ah loo-shaqeeyayaasha ama isu-tagyadu ay ku qaban doonaan xarumo tallaal goobaha shaqada ama hoolalka isu-taga. Tanni waxay u baahan doontaa qorshaynta iyo isku dubaridka maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga. Ma noqon doonto ikhtiyaarka qayb kasta oo ka mid ah shaqaalaha. Laakiin qaar ka mid ah ayay macno u samayn doontaa, ilaa iyo intay jirto shaqaale ku filan gobolka oo ka shaqeeya rugta caafimaadka. La xiriir maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga haddii aad danaynayso qabashada munaasibad.

Siday shaqaalaha safka hore u samaynayaan ballamaha tallaalka?
Ma caawin karaan isu-tagyadu?

Isu-tagyada ayaa ka caawin kara xubnahooda inay ogaadan halkay tegayaan si ay u soo samaystaan ballamahooda tallaalka. Dadka Oregon ee uqalma waxay tegi karaan covidvaccine.oregon.gov si ay u hubiyaan macluumaadka tallaalka ee bulshooyinkooga, oo ay isaga diiwaangaliyaan Qalabka Istallaal ee Oregon, oo ka hubi macluumaadka gaarka ah ee degmada. Qabashada ballamaha hadda lagama heli karo covidvaccine.oregon.gov. Shaqaalaha safka hore waa inay hubiyaan sanduuqa sheegaya inay yihiin shaqaale safka hore ah markay iska diiwaangeliyaan qalabka Istallaal ee Oregon. Shaqaalaha safka hore waxaa la siin doonnaa mudnaanta lingaxyada lagu furayo ballamaha ee kadib muddada waqtiga uqalmitaankoogu furmo Abriil 5.

Dadka Oregon waxa kale oo ay caawimaan ka heli karaan iyagoo u diraya farriin qoraal ah AMA COVID lambarka 898211 (Kaliya Ingiriisi iyo Isbaanish) ama iimayl u diraya ORCOVID@211info.org (caawinaada luqadda ayaa la heli karaa). Haddii aysan ku heli karin jawaabaha su'aalaha tallaalka COVID-19 websaydka, qoraal ahaan, ama iimayl, waad wici kartaa 211 ama 1-866-698-6155, (lambar bilaash ah) oo furan laga bilaabo 6 a.m. ilaa 7 p.m. maalin kasta, xitaa fasaxyada. Heerka maqalka ayaa ka badan kara inta caadiga ah. Waxaa lagu siin doonaa ikhtiyaar aad u hesho wicitaan danbe halkii aad sugi lahayd.

Ma jiri doontaa kala mudnaysiinta shaqaalaha safka hore dhexdooda?

Bilowga Maarso 29, soogalootiga iyo shaqaalaha beer xilliyeedka, shaqaalaha cuntada badda iyo beeraha, shaqaalaha ka shaqeeya cuntada, iyo dab-damiyayaasha dhulka cidlada ah ayaa uqalmi doona tallaalka kahortagga COVID-19. Dhammaan shaqaalaha kale ee safka hore waxay uqalmi doonaan Abriil 5.

Shaqaalaha safka hore waa qof haya shaqo u galinaysa khatar sare qaadista COVID-19 sababtoo ah kuma qaban karaan waajibaadka shaqadooda guriga ama goob kale oo xaddidaysa isku dhawaanshaha dhow ama joogtada ah ee dadka kale ee ka baxsan qoyskooda. Shaqada shaqaalaha safka hore sidoo kale waa inay la lahaata:

- Xiriirka joogtada ah ee kuwa kale ee ka baxsan qoyskooda (wax ka yar 6 fiit); iyo
- Xiriir dhow oo joogto ah (wax ka badan 15 daqiiqo) dadka kale ee ka baxsan qoyskooda.

Haddii qofku buuxiyo shuruudahan, oo lagu daro liiska warshadaha ay ku qeexday CDC wejiyada 1b ama 1c, ama ku qoran liiska Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA), markaa qofka waxaa loo arkaa inuu yahay shaqaale safka hore ah.

Liiska OHA halkan ayaa laga heli karaa:
https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li3527A.pdf

Liiska dhammayska-tiran ee CDC, oo ay ku jiraan qeexitaanno halkan ayaa laga heli karaa:
https://www.cdc.gov/vaccines/covid-19/categories-essential-workers.html

Dadku waxay u baahan doonaan inay go'aan ka gaaraan naftooda haddii ay yihiin shaqaale safka hore ah. Gobolku uma baahna xaqiijin ah in qofku ku dhex jiro qayb gaar ah, in kastoo laga yaabo in lagugu weydiiyo goobta tallaalka qaybta aad ku jirto.

Iyadoo ay ugu wacan tahay mugga su'aalaha ku saabsan u-qalmitaanka shaqaalaha safka hore, OHA kama jawaabi karto su'aalaha gaarka ah ee ku saabsan u-qalmitaanka shaqaalaha safka hore. OHA waxay sii wadi doontaa inay ka shaqeyso Su'aalaheeda Inta Badan La Is Weydiiyo (FAQs), markaa ka hubso kheyraadkaas si waqtiyaysan wixii jawaabo gaar ah

Su'aalaha Inta Badan La isweydiiyo (FAQs) halkan ayaa laga heli karaa:
https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li2390u.pdf

Kuwan soo socda waa su'aalo aad ka heli karto shaqaalaha:

Halkeen ka heli karaa tallaalka?

Hadda, meelaha laga bixinayo talaalka waxaa ka mid ah maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaanka ama iskaashatadooda, farmasiyada, isbitaalada, munaasibadaha tallaalka, Xarumaha Caafimaadka ee Aqoonsiga leh ee Federaalka, iyo maamulka caafimaadka qabaa'ilka. Hadda sahayda oo xadidan awgeed, daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (xafiiska dhakhtarkaaga) uma badna inuu heli doono tallaalo.

Sidee ayaan u ogaadaa haddii aan u qalmo inaan is tallaalo?

Booqo covidvaccine.oregon.gov oo isticmaal aaladad Istallaal ee Oregon. Waxaa loogu talogalay inay ka caawiso inaad fahamto haddii aad uqalanto. Waxaad u baahan doontaa inaad isdiiwaan geliso si aad u hesho xogtii ugu danbaysay ee fursadaha talaalka. Haddii aad u baahantahay caawimadda aad isku diiwaangelineysid, weydiiso inuu qof ku caawiyo ama wac 211:

Goormaan is tallaali karaa?

Laga bilaabo Maarso 29, qaar ka mid ah shaqaalaha safka hore ayaa uqalmaya inay qaataan tallaalada COVID-19; shaqaalaha safka hore ee hadhay waxay u qalmayaan laga bilaabo Abriil 5. (Halkan ka eeg liiska dhammayska-tiran ee cidda uqalanta iyo waqtiga.) Maaddaama talaalku yar yahay, waxay kugu qaadan kartaa dhowr maalmood ama xitaa toddobaadyo inaad hesho ballan tallaal. Waxaad sugtay muddo dheer. Way adag tahay in la sugo laakiin waxaan codsanaynaa inaad dulqaad lahaato fadlan. Degmooyinka qaar ayaa wali tallaalaaya dadka kale ee Oregon ee uqalma sahayda tallaalkuna waa mid kooban.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

- Tag covidvaccine.oregon.gov.
- U dir erayga ORCOVID lambarka 898211 si aad u hesho xogihii ugu danbeeyay oo ah farriin qoraal ah/ SMS (Ingiriis iyo Isbaanish kaliya)
- U dir limayl ORCOVID@211info.org

Haddii aadan ka heli karin jawaabaha su'aalaha tallaalka COVID-19 websaydka, qoraal ahaan, ama iimayl, wac 211 ama 1-866-698-6155, (lambar bilaash ah) Wuxuu furan yahay laga bilaabo 6 a.m. ilaa 7 p.m. maalin kasta, oo ay ku jiraan fasaxyadu. Waqtiyada sugitaanku way dheeraan karaan sabab la xariira wicitaannada oo badan. Waxaa jira ikhtiyaar aad ku helayso dib u soo wicitaan halkii aad sugi lahayd. Ingiriisi iyo Isbaanish ayaa looga hadlaa xarunta wicitaanka. Turjumaad bilaash ah ayaa lagu heli karaa dhammaan luuqadaha kale. TTY: Garaac 711 ama wac 1-866-698-6155.

Aqoonsigee ayaan u baahannahay inaan la imaado si aan u caddeeyo uqalmideyda?

Uma baahnid inaad muujiso caddayn ah inaad uqalanto, laakiin bixiyayaasha tallaalka ayaa ku weydiin kara inaad si uun u caddayso inaad tahay.

Immisa ayaa qiimahu joogaa?

Miyaan u baahan nahay inaan lahaado caymis si la ii tallaalo? Talaalka COVID waxaa lagugu siin doonaa si bilaash ah. Uma baahnid caymis caafimaad. Haddii aad haysato caymis caafimaad, adeeg bixiyaasha tallaalka ayaa ka qaadi kara maamulka shirkadda caymiskaaga lacagta tallaalka ay ku siiyeen. Tani waxaa looga jeedaa in lagu weydiin karo macluumaadka caymiskaaga markaad qaadato tallaalka COVID, marka fadlan soo qaado kaarkaaga caymiska caafimaadka haddii aad leedahay caymis. Adeeg bixiyayaasha tallaalku lacag kaama qaadi karaan tallaalka.

Su'aalaha Siinta Tallaalka

Maxaa dhacaaya kadib markaan qaato tallaalka? Miyay tahay weli inaan qaato taxaddarrada badbaadada?

Waxaad u baahan doontaa inaad xidhato maaskaro oo aad ka fogaato kadib markaad qaadato tallaalka hadda. Waxba caadi kuma noqon karaan illaa inta la tallaalayo dad ku fulan. Waxaan ognahay in qaadashada tallaalka kahortagayo inan dadku bukoodaan. Laakiin wali kama warqabno in qofka qaata labada kuuro uu wali faafin karo COVID-19. Ma doonayno inaad ku faafiso dadka kale ee aan wali qaadan tallaalka. Waa muhiim inaad xirato maaskaro, oo aad ka fogaato 6 fiit dadka kale, aad farxalato, oo aanad waqti la qaadan dadka aadan la noolayn.

Waxaa kale oo aad u baahan doontaa inaad qaadato laba qaadasho oo ah tallaalka. Inta badan noocyada talaalka, waxaad u baahan doontaa labo kuuro. Waxaad helaysaa kuurada labaad 3 ama 4 asbuuc kadib markaad qaadato tan koobaad. Waa muhiim inaad hesho labada kuuraba si talaalku u shaqeeyo. Kala hadal cidda kuurada koobaad ku siisay marka aad heli karto kuurada labaad. Waa inaad ka heshaa kuurada labaad isla meeshii lagaa siiyay kuuradaada koobaad. Sidaan samee ilaa in kalkaaliso ama dhakhtar uu kuu sheego maahee inaad kuurada labaad ka hesho meel kale.

Kadib qaadashada tallaalka COVID-19, waxay u badan tahay in gacantu ku xanuuni doonto. Waxaad dareemi kartaa murqo xanuun, xanuunka Kala goyska, daal, madax xanuun, qarqaryo, ama laga yaabee qandho. (Qandhada ayaa ah mid aad u yar.) Arintaan ayaa caadiyan ka dhigan in talaalku shaqaynaayo si loo dhawro caafimaadka jirkaaga. Kuwaani waa calaamado caadi ah oo muujinaaya in jirkaagu dhisaayo difaac. Mararka qaar dhibaatooyinkaan ayaa kaa joojin kara inaad shaqooyinkaaga caadiga ah qabsato dhawr maalmood. Inta badan ciladahaan talaalka ka dhasha ayaa kaa ba'aaya maalmo yar gudahood.

Ka waran haddii aan qaado COVID-19 kadib kuuradayda koobaad?

Haddii aad qaado COVID, waa inaad raacdaa tilmaamaha caafimaadka Dadwaynaha oo aad joogtaa guriga 14 maalmood xataa haddii aad qaadatay kuuradaada koobaad.

Muddo intee le'eg ayaan u baahan doonaa in la i korjoogteeyo kadib markaan qaato tallaalka?

Waxaa lagu korjoogtayn doonaa 15-30 daqiiqo. Tani waxay ka dhigan tahay inaad u baahan tahay inaad joogto meesha lagugu talaalay si talaal bixiyuhu kuula socdo si loo hubiyo inaad badqabto.

Yaan wacayaa haddii aan yeesho dhibaatooyin: xarunta tallaalka mise daryeel bixiyahayga koowaad?

Waxyeellooyinka yaryar waa ku caan kadib tallaalka COVID-19. Haddii aad qabto walaacyo ku saabsan wixii waxyeello ah kadib maraad ka tagto goobta tallaalka, waa inaad la xiriirtaa daryeel bixiyahaaga koowaad. Ama waxaad tegi kartaa daryeelka Degdegga ah ama xarunta xaaladaha degdegga ah.

Sida loo taageerayo munaasibadaha tallaalka deegaanka/ama loo qabanayo munaasibad

Shaqaalaha carbinta ee munaasibadaha tallaalka deegaanka/ munaasibadaada tallaalka

Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee haysta u qaadashada tallaalka si degdeg ah waa yaraanshaha dadka uqalma inay bixiyaan tallaalda. Warka wanaagsan ayaa ah, inay jiraan dad uqalmay inay sameeyaan tan, sida farsama-yaqaanka caafimaad ee gargaarka degdegga ah (EMTs), shaqaalaha caafimaadka ee hawl-gabka ah, iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee hore ee beddelay xirfadaha. Weli lama weydiisan caaawimaad. Waad caawin kartaa carbinta mutadawaciintan adigoo wacaya xubnahaaga iyo shaqaalahaaga, qoysaskooda iyo xiriiradooda, iyo macaamiishaada. Iska diiwaangali si aad u tabarrucdo halkan https://serv-or.org.

Qabo munaasibad tallaal bixin

Waxaan rajaynaynaa in qaar ka mid ah isu-tagyadu ay ku qaban doonaan rug tallaal goobahooga shaqada ama goobaha guryeynta shaqaalaha ama hoolalka kulannada. Tanni waxay u baahan doontaa qorshaynta iyo isku dubaridka maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga. Ma noqon doonto ikhtiyaarka urur kasta, Laakiin waa ikhtiyaarka qaar ka mid ah isu-tagyada waaweyn illaa iyo inta ay jirto tallaal ku filan iyo shaqaale caafimaad oo laga heli karo gobolka oo ka shaqeeya rugta caafimaadka **La xiriir Maamulka Caafimaadka Dadweynaha ee Deegaankaaga (LPHA) haddii aad danaynayso qabashada munaasibad bixin tallaal.**

Kheyraadka baahiyahaaga isgaarsiineed:
Tusmada iimayl-ka, Nuxurka wargayska, nuxurka warbaahinta baraha bulshada

Oregon Health Authority

Helitaanka dukumiintiga: Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriis, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. Kala xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.

OHA 3675 (04/01/2021) Somali